



Demario Strickland
Deputy Superintendent of Teaching and Learning



Nofeembar 20, 2023

Qoysaska qaaliga ah ee Ardayda RCSD ee Fasalada 6-8,

Waxaa rabnaa inaa ku ogeysiinno laba siyaasadood oo cusub oo ay ansixiyeen Gudiga Waxbarashada Agoosto: Siyaasada Hormarinta iyo Haynta 4750 iyo Siyaasada Nidaamka Darajooinka 4710.

Horumarinta iyo Haynta

Laga bilaabo sanad dugsiyeedkan, ardayda fasalada 7 iyo 8 ee ku dhaco laba maado ama ka badan mala dalaciin doono qorshe sugar oo muujinaya inay buuxin karaan heerarka fasalka la'aantiisa. Tani macnaheedu waa ardayda aan helin celceliska ugu dambeeyo ee 65% ama ka sareeyo fasaladooda asaasiga ah (Farshaxanka Luuqada Ingiriisiga, xisaabta, sayniska, iyo taariikh) waxaa looga baahanaan doonaa inay aadaan iskoolka samarka.

Bulshada iskoolka ahaan, waxaa mas'uul naga saran inaa hubino in ardayda u diyaar garoobaan dugsiga sare iyo wixii ka dambeeyo. Ansixinta koorasayaashaan iyo dhameystirka xilalkooda waxay muhiim u yihiin guusha waxbarasho iyo fursadaha mustaqbalka.

Nidaamka Darajada

Sidoo kale, sanad dugsiyeedkan, Degmada waxay badaloosaa nidaamka dhaqameedka ee buundooyinka xarfaha waxayna u badaloosaa nidaamka buundooyinka tirada miisaan ahaan ah 0-100% ee ardayda fasalada 6-12. U dhaqaaqida nidaamka buundooyinka tirada waxa horseed u ah balanqaad lagu horumarinayo hufnaanta, saxnaanta, iyo cadaaladda sida ardayda loo qiimeynaayo

- **Saxnaanta iyo Hufnaanta:** Darajooinka tirada waxay bixiyaan matalaad sax oo dheeraad ah ee waxqabadka ardayga. Waxay bixiyaan sawir cad oo ku saabsan meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay ugu baahan yihiin horumarin maado kasto, taasoo u ogolaanayo ardayda inay si fiican u fahmaan hormarkooda.
- **Jawaab celinta iyo Gool Dejinta:** Darajooinka tirooyinka waxay fududeeyaan jawaab celin gaar ah, taas oo ka caawin karto ardayda inay aqoonsadaan meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay ku liitaan. Jawaab celintaan waxay asaas u tahay dejinta goolal tacliimeed oo cad iyo samaynta horumarin.
- **Aqoonsiga Kuliyada iyo Jaamacada:** Kuliyado iyo jaamacado badan ayaa aqoonsan nidaamka buundooyinka tirada marka la qiimeenaayo foomamka jaamacadaha. Marka la waafajiyo nidaamka buundooyinka machadyadaan, waxaa hiigsaneynaa inaa si wanaagsan ugu diyaarino ardaydeena u gudbida waxbarashada sare.
- **Sinaanta iyo Cadaalada:** Nidaamka buundooyinka tirada ayaa yareeso shaqsinimo la xiriirto buundooyinka xarfaha, iyadoo la hubinaayo in si siman loo qiimeeyo waxqabadka ardayga.
- **U Diyaargarowga Kuliyada iyo Shaqada:** U diyaarinta ardayda mustaqbalka waa qayb aasaasi ah oo ka mid ah hadafeena. Darajooinka tirada waxay awood u siinayaan ardayda inay hormar ka sameeyaan tartan aqooneed caalami ah iyo suuqa shaqada.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in Meelaynta Waqtii hore, Buundooyinka Jaamacada, iyo Baccalaureate Caalamiga ah ay noqon doonaan fasalada kaliya ee miisaan dheeraad ah la saaro darajada tirada ee laga gaarey, maadaama kuwaan ay u baahan yihiin shaqo koorsu adag. Sidoo kale, diiwaanka ardayga waxa loo bedeli doonaa darajoojin tirooyin ah. Hadii mar hore darajada xarafka loo bedelin darajada tirada, ardayga waxoo heli doonaa tirada ugu koreeso ee ku dhex jirto darajadaas tirooyinka xarafkaas. Tusaale ahaan, A waxa matalaayo ardayda dhibcaha 90-94. Hadii darajada ahayd A eena ahayn darajo tiro ah, ardayga waxoo heesan doonaa 94 ee diiwaankooda.

Waxaa rabnaa inaa kula shaqeyno saa u hubinino in canugaaga helo waxbarashada ugu fiican ee suurtogalka ah. Fadlan ha ka laalaabanin inaa la xiriirtid la taliyaha canugaaga ama maamulaha wixii su'aalo ah.

Waa ku mahadsan tahay taageeridaada joogtada ah iyo aaminaantaada waxbarashada canugaaga.

Run ahaantii,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Demario Strickland".

Demario Strickland
Kuxigeenka Kormeeraha Waxbarashada iyo Barashada